

La noolaanshaha Cudurka Kaadi Macaanka/Sonkorowga

Waxbarashada Qoyska ee Kaadi Sonkorowga
Waxaa soo Jeedinaya Shaqaalaha Bulshada ee Kaadi
Sonkorowga qaabilsan

11/23
PE3325SO



Seattle Children's®



Adeegahaaga bulshada ee sonkorowga

- Wuxuu kula kulmi doonaa wakhtiga cudurka la baarayo si uu u barto qoyskaaga iyo ilmahaaga
- Wuxuu kula kulmi doonaa wakhtiga aad booqanayso rugta caafimaadka si uu kuu siiyo taageerooyin noocyo badan
- Wuxuu yahay qayb muhiim ah oo ka tirsan kooxda caafimaadka ilmahaaga



Waa maxay sababta booqasho ee adeegaha bulsho ee sonorowga?

- Ka hadal dareemada ku saabsan sonkorowga
- Dhisidda adkaysi aad kula noolaato kaadi sonkorowga
- Wax ka qabashada walaacyada la xiriira qulubka iyo walwalka
- Barashada sida loola tacaalo daalka ka dhasha cudurka kaadi sonkorowga
- Kahadalka khilaafka dhexmara waalidiinta iyo carruurta
- Tilmaamidda sida la isugu miisaamo madaxbannaanida iyo ka qaybgalka waalidka ee daryeelka qaabilsan kaadi sonkorowga
- Ka caawinta saaxiibada inay fahmaan kaadi sonkorowga
- Kahadalka siday u ekaan lahayd isticmaalidda teknoolojiyadda qaabilsan kaadi sonkorowga, sida bamka
- Taageeridda waalidiinta, walaalaha iyo daryeeleyaasha kale
- Ka hadalka wadaagidda daryeelka qaabilsan kaadi sonkorowga ee qoysaska labada waalidi isla joogaan



Noo sheeg haddii aad caawimo ugu baahan tahay:

- Inaad hesho gaadiid ku geeya ballanta rugta aad ku leedahay
- U helidda kaam qaabilsan kaadi sonkorow ilmahaaga
- Kala hadlidda maamulka iskoolka ilmahaaga wixii ku saabsan qaabilaadaha kaadi sonkorowga
- Helidda dabiibe ama la-taliye





**Xasuusinaha muddada
qoyskaagu ku jiro jawiga la
qabsiga kaadi sonkorowga...**



Seattle Children's®

- Dareeno badan, sida quus, cabsi, caro iyo is-canaanad ayaa iman kara waana jawaab caadi ah oo laga bixiyo cudurkii cusub ee la ogaado iyo waliba qayb ka mid ah hannaanka wax la qabsiga
- Waxaanu kaala shaqayn doonaa inaad isku miisaanto “sonkorta dhiigga oo aad ilaaliso” iyo nolol fiican oo ilmahaaga iyo qoyskuba helaan
- Naftaada utur; filashooyin dhab ah ka qab xakamaynta guluukoosta ee naftaada iyo ilmahaaga/dhowr iyo toban jirka
- Dhug u yeelo luuqadda la isticmaalayo marka lagaga hadlayo kaadi sonkorowga gurigaaga (sonkoraha dhiiggu ma **FIICNA** ama ma **XUMA**, cuntadu ma **FIICNA** ama ma **XUMA**)
- La wadaag ilmahaaga ama dhowr iyo toban jirka xogta ku saabsan maaraynta kaadi sonkorowga; inuu isagu is wado ha ku degdegin



Sida na loo helo

- Wac kooxdeena muddaynta ballanta oo waydiiso inay kuu qabtaan booqasho aad ugu tagto qeybta adeegga bulshada
- Inta booqashadu kuu socoto, waydii MA, RN ama bixiyaha caafimaad inaad la hadasho qeybta adeegga bulshada
- Wac ama iimeyl u dir Endo RN oo waydiiso in lagugu xiro adeege bulsho





Seattle Children's[®]
HOSPITAL • RESEARCH • FOUNDATION

Rajada. Daryeelka.
Daaweynta.